

## 90<sup>th</sup> Day Letter-In Process

Taariikhda:

Gacaliye Waalid:

Marka la eego diiwaanadayada, ilmahaagu wuxuu kujiraa hab-socodka helista dhammaan tallaalka looga baahan yahay dhigashada dugsiyada Wisconsin. Waxa aanu kugu boorinaynaa inaad sii waddo oofinta ballamaha tallaalka oo ilmahaaga geey ballamahan si aad u hubiso in ilmahaagu noqdo mid qaatay tallaalka loo baahan yahay da'diisa.

Tallaalku waa mid kamid ah hababka ugu muhiimsan ee ka ilaalinta carruurta cudurrada iyo cawaaqibyada ka iman kara cudurradan. Tallaalku si gaar wuxuu muhiim ugu yahay carruurta da'da dugsiya sababtoo ah carruurta dugsiya dhigtaa waxay si joogto ah ugu dhaw yihiin dad kale kuwaasi oo ay dhici karto in laga ilaaliyey ama aan laga ilaalin cudurradan.

Si aad ugu taagnaado ku-dhaqanka Sharciga Tallaalka Ardayga Wisconsin (Wisconsin Student Immunization Law), fadlan la xidhiidh bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga si aad u hesho tallaalka loo baahan yahay. Ku boori bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga inuu isticmaalo Diiwaanka Tallaalka Wisconsin (Wisconsin Immunization Registry) iyo wixii diiwaano tallaalka ah ee aad ka hayso ilmahaaga si uu u go'aamiyo tallaalka ilmahaagu u baahan yahay inuu helo. Haddii ilmahaagu aanu lahayn bixiyaha daryeelka caafimaad, fadlan la xidhiidh waaxda caafimaadka deegaankaaga si aad u go'aamiso haddii ilmahaagu mutaystay inuu helo tallaalka waaxda caafimaadka. Macluumaadka la-xidhiidhka waaxda caafimaadka deegaanka waxaa laga heli karaa bogga internetka: <https://www.dhs.wisconsin.gov/lh-depts/counties.htm>

Fadlan ogow in dayrta sannad dugsiyeedka dambe, diiwaanada tallaalka ilmahaaga dib loo qiimayn doona si loo hubiyo inuu qaatay tallaalka la rabo heerkiisa/eeda fasalka ama ka dhaafista feelka ugu jiro. Haddii caddaymo ku filan aan laga dhiibin ilmahaaga, waxa dhici karta in loo baahdo inuu guriga joogo oonu dugsiya iman.

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan tallaalka, fadlan booqo bogga internetka: <http://www.cdc.gov/vaccines/vac-gen/default.htm>

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay ka badbaadinta dhammaan carruurta dugsiyada Wisconsin cudurrada lagaga hortagi karo tallaalka.